IIB MA GALO

FAAFIN RASMIGA

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومالي الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 20 Feb. 1981 L. 1 R 2

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaali gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqiga loo gooyey wuxu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Faàfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta

KOOBNIIN

SHARCI W. M.

AMARKA MADAXWEYNAHA J. D. S.

Lam. 9,13 Jen. 1981, Laa-11d Sharciga lamb. 54 ee 11ka Luulyo 1977 Bogga 170

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNE L. 7 ee 14 Dis. 1981, xeer hoose oo lagu Faahf-aahi naayo maamulka Safaaradaha iy hantida dawladda ee Dibedda jiita » 172

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 8 c 20 Nof. 1980, Dallacaad Sarkaalnimo » 179

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 9 c 24 Dis. 1980, Dallacaad Sarkaalnimo » 180

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 1 ee 25 Dis. 1980, Dallacaad Sarkaalni- mo » 181

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 1 ee29 Dis. 1980, Dallacaad » 182

Madbacadda Qaranka

WASAARADDA H. GUUD, 5 Maarso 1980, Naado Dhul Jaalle Luna Afrika L. 83 » 183

WASAARADDA H. GUUD, 5 Maarso 1980, Naado Dhul Jaalle Faaduma Abuukar Cabdiraxmaan L. 84 » 184

WASAARADDA H. GUUD, 25 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Faaduma Xaaji Maxamed L. 85 » 185

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Faaduma Xaaji Axmed L. 86 » 186

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdulqaaliq Cali Dhegaqoo L. 887 » 187

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Muuse Bahdoon L. 88 » 188

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Cali Coofle L. 89 » 189

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Ducaale Jaamac L. 90 » 190

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Dham. Cabdulaahi S. Xersi L. 91 » 191

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Xuseen Maxamed Xuseen L. 92 » 192

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Xersi L. 93 » 193

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Ijaaba Xaaj Cabdi Gurey L. 94 » 194

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Faaduma Xaaji Cabdi Gurey L. 95 » 195

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud L. 96 » 196

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980. NAADO Dhul Jaalle Qaali Maxamed Cali L. 97 » 197

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980. NAADO Dhul Jaalle Maxamed Cali Balilla L. 98 » 198

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980. NAADO Dhul Jaalle Shamso Ibraahim Cali L. 99 » 199

WASAARADDA H. GUUD, 29 Maarsa 1980. NAADO Dhul Jaalle Ruun Cali Cabdulla L. 100 2 2 2 » 200

WASAARADDA H. GUUD, 8.2.81, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Maxaadow » 201

WASAARADDA H. GUUD, 8.2.81 Naado Dhul Jaalle Maxamed Sheekh Cabdalla » 202

WASAARADDA H. GUUD, 8.2.81 Naado Dhul Jaalle Abuukar Cali Calasoow » 203

WASAARADDA H. GUUD, 8.2.81 Naado Dhul Jaalle Maxamed Abuukar Cumar » 204

WASAARADDA H. GUUD, 8.2.81
Naado Dhul Jaalle
Maxamed Axmed Cabdi » 205

WASAARADDA H. GUUD, 8.2.81
Naado Dhul Jaalle
Sheekh Ibraahim Maxamed » 206

MAXKAMADDA Gobolka Sh/Hoose, 4.2.81,
Lumid Buug Kayd L. 3124 ku qoran
Maxamed Daahir Aadan » 208

MAXKAMADDA Gobolka Banaadir, 2.2.81,
Lumid Buug Keyd L. 16537 ku qoran
Cabdullaahi Xasan Caafiyow » 207

MAXKAMADDA Gobolka Banaadir, 19.2.81,
Lumid Jeeg wareeg L. 261770 ku qoran
Xuseen Jaamac Xasan » 209

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.2.81, Lumid Buug Keyd L. 14042, ku qoran Maxamuud Salaad Cigaal.
» 210

QAYBTA LABAAD

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS, L. 9 ee 13 Jen. 1981, Laalid Sharciga lamb. 49 ee 11ka Luulyo 1977.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod.83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga lamb. 54 ee 11ka Luulyo 1977 kuna saabsan habka maamulka Xoolaha Dawladda;

MARKUU ARKAY : Amarka Madaxweynaha JDS Lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan xukunka degdegga ah;

MARKU TIXGELIYEY : In ujeeddadii Sharciga kor ku tilmaaman oo ahayd in Guddiyada Shaqaalaha iyo Unugyada Xisbigu ay ka qeyb qaataan DHAWRISTA, XANNAANEYNTA, KORDHINTA DHAQAALAHA DALKA, KA HORTAGGA DAYACA, XANNAANO XUMADA CAAJISKA IYO TUUGADA aan si habboon loo dhaqan gelin, Sharcigiina loo muujiyey mid dhaliyay dad maamulka ka mid ah in ay Gaashaan ka dhigteen, ugana baxsadeen masuuliyado badan oo leh dayac iyo ku tikri fal hanti Qaran intaba;

MARKUU ARKAY : In ay lagama maarmaan tahay in la laalo ku dhaqanka Sharcigaas, daraasadna loogu laabto si khaladaadka hore u dhacay aan looga sii faa'ideysan, qof kastana uu masuuliyaddiisa toos u qaado;

MARKUU DHEGEYSTAY : Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la laalay ku dhaqanka Sharciga Lambar 54 ee 11ka Luulyo 1977, qaybtiisa ku saabsan Xubno Guddiga Shaqaalaha iyo Guddiga ama Unugga Xisbiga ee Goobta Shaqo in ay maamulka la saxii-

Qod. 2aad

1. Maamulka Xoolaha Qaranka ee Wasaaradaha Waxaa ka masuul ah Wasiirka, Wasiir Kuxigeenka; Agaasimaha Guud ee Agaasimayaasha.

2. Maamulka xoolaha Qaranka ee Wakaaladaha Warshadaha, Sharikadaha iyo Mashruucyada Dawladda waxaa ka masuul ah Wasiirka, Wasiir Kuxigeenka, Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha.

Qod. 3aad

Guddiyada Shaqaalaha ee Hay'adaha Qaranka waxay ka masuul yihiin kormeeridda, hubinta habsami ku dhaqanka Hantida Dawladda iyo ka ilaalinta dhibaato u geysashada tooska ah iyo mid aan toos ahaynba.

Qod. 4aad

1. Qof kasta oo u gefa habka maamulka Xoolaha Qaranka, ama gudan waaya xilka ka saaran kormeeridda, ilaalinta iyo hubinta ku dhaqanka shuruucda maamulka Lacagta waxaa loo aqoonsanayaa, haddii falkiisu keeneyn dambi ka weyn, inuu ula kac u gabay xilkiisii Xafiiseed, waxaana lagu ciqaabayaa ilaa hal Sano oo Xarig ah ama ilaa 10.000 (Tobankun) Shilin oo ganaax ah.

2. Qaadista dembiga ku tilmaaman Lambarka 1aad ee Qodobkan waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qod. 5aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Saxiixo Madaxweynaha JDS. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO. 13.1.1981

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNE L. 7, 14. Dis 80,XEERKA HOOSE OO LAGU FAAHFAAHINAAYO MAAMULKA XISAABAADKA SAFAARADAHA IYO HANTIDA DAWLADDA JIRTA.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qodobka 82 iyo 83 ee Dastuurka J. D. S ;

MARKUUARKAY : Amarka Madaxweynaha J. D. S. Lam. 8 ee 4.11.80 ee ku saabsan beeqaaminta Kharajka iyo Xannaanada Hantida Qaranka;

MARKUU ARKAY : Amarka Madaxweynaha J. D. S. Lam 1 ee 21.10.80;

MARKUU ARKAY : Sharciga ay ku dhisan tahay dawladdu, sharci lambar 14 ee 3.6.1962 iyo Xeerka Madaxweynaha ee lambar 316 ee17.12.1962 oo ku saabsan habeynta xafiisyada Guud ee Maamulka Dhexe ee Dawladda;

MARKUU ARKAY : Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda,
Arrimaha Dibedda, lambar 9 ee 8.9.1971 ee sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26.4.1973 (Foreign Service Law);

MARKUU ARKAY : Sharciga Xisaabaadka iyo Maamulka Lacagta Dawladda sharci Lambar 2 ee 29.12.-1961 iyo wax ka beddelkiisa iyo Xeer nidaamiyaha Xisaabaadka Dawladda, kuna soo baxay Xeerka Madaxweynaha Lambar 317 ee 17.12.1962 iyo wax ka beddelkiisa.

MARKUU ARKAY : Xeer nidaamiyaha kaydinta Hantida Dawladda kuna soo baxay Xeerka Madaxweynaha Lambar 318 ee 18.12.1962 iyo waxka beddelkiisa.

MARKUU ARKAY: Sharciga Shaqaalaha Dawladda Lambar 5 ee 2.2.1980;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Arrimaha Dibadda. Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda:-

QAYBTA 1AAD LACAGTA IYO XISAABAHA

Qodobka 1aad

Wasaaradda Waxaa Maamulka Xisaabta Safaaradda si wadajir ah uga mas'uul ah Danjiraha ama Sii-hayaha iyo Xisaabiyaha. si gaar ah waxaa Xisaab xirka uga mas'uul ah Xisaabiyaha. Danjiruhu waa inuu hubiya in bil walba bisha ku xigta 10keeda inuu Xisaabiyuhu soo gudbiyay, sida uu qorayo Qod. 146aad ee Sharciga Maamulka Xisaabaha Dawladda.

Qodobka 2aad

Kharaj iyo Ballanqaad walba ee Safaaraddu galayso waa inay isla oggolaadaan, islana agaadaan Danjiraha iyo Xisaabiyaha. Foojarada iyo Jeegagana waa inay wadajir u Saxiixaan.

Qodobka 3aad

Safaaradaha oo dhammi waa inay isticmaalaan buugga ilaalinta kharajka (Vote), buugga Lacagta cad (cash book) iyo buugga Alaabta (inventry).

Qodobka 4aad

Lacag loogu tala galay Madax-xige laguma wareejin karo Madax-xige kale iyadoon oggolaansho laga helin Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lamana kharaj garayn karo Telekiska, Telefoonka, Boostada, Martigelinta, Mucaawinada iyo Daawada ma dhaafi karaan intii loogu tala galay.

Qodobka 5aad

Safaarad kharaj garayn karta ma jirto ka badan intii Miisaaniyadda loogu qarraray. Haddii ay gasho kharaj aan miisaaniyadda ku jirin wuxaa Gunnadiisa si toos waaxda Xisaabaha iyo Lacagta ee Wasaaradda Arrimaha Dibadd auga goyn doontaa Danjira ama Sii-hayaha.

Qodobka 6aad

Dhammaan Safaaraduhu Lacagta ay Dakhli ahaan qabtaan oo ka soo gasha Baasaboortada, Dhaafiyo-yaalka, Sharciyanta irxi; waa inay u soo d[illegible]aan Wasaaradda Arrimaha Dibedda si ay ugu sh[illegible]oto khasnadda Dawladda.

Qodobka 7aad

Waa in Xisaab gaar ah loo furaa Xisaabah[illegible] ka baxsan maamulka caadiga ah ee Safaaradda[illegible]ida Lacagta dadka caafimaadka dibadda u aada, [illegible]aaliyadda iyo Lacagyowga kale ee Safaaraduhu [illegible]hayaan Hay'adaha Dawladda.

Qodobka 8aad

Lacagta Maamulka Safaaradda cidna lam[illegible] amaahin karo, hase yeeshee, Dibulumaasiyiin[illegible]. waxaa loo horamari karaa ilaa saddex (3) bilo[illegible] gunnadood, sannad gudihiisa horumarintaas w[illegible]xaa laga jarayaa lix bilood gudahood. Haddii l[illegible]ga gooyn waayo, Danjiraha iyo Xisaabiyaha ayaa [illegible]ga jari doonaa ee Mas'uulka ah. Horumarinta waa in bixinteeda iyo jarrideedaba lala socodsiiyaa Waaxda Xisaabaha iyo Lacagta ee W. Arrimaha Dibedda Horomarintaas waxna la siin karo oo ka[illegible]ya markii uu qofku Safaaradda Shaqada ka bilaabo.

Waaxda Maamulka waa inay dabagasha[illegible], hubiyaana in laga jaray qofkii la siiyey horumarintaas laguna soo celiyey khasnadda Dawladda.

Qodobka 9aad

Safaaraddu waa inay Miisaaniyadooda so[illegible] diraan Sanad walba bisha Agoosto 31da, Safaa[illegible]dii soo diraaydo waqtigaas waxaa lagu celin doonaa tii Safiirkii la soo dhafay.

Qodobka 10aad

Dikumiintiga Lacagta ah Safaaraddu ma [illegible]ala qaadan karaan, haddiise ay Safaaradda ka d[illegible]ammaadaan waa inay Wasaaradda Arrimaha Di[illegible]da soo warsadaan, sida Baasaboorrada, Dhaafiy[illegible]yaasha iyo Buugaagta lacag qabashada Guud.

Qodobka 11aad

Danjiraha iyo Dibloomaasiyiinta kale kama bixi karaan dalka ay ku magacaaban yihiin haddii aanay oggolaasho ka helin Wasaaradda Arrimaha Dibadda. Qofkii ka baxa goobtiisa shaqo tallaabo sharci ah ka sokow, kharajka ku baxa safarkaas asaga ayaa iska bixinaya markuu yahay qof ka tegay shaqadiisii.

qof ka tegay shaqadiisii.

QODOBKA 12AAD

Waaxda xisaabaha iyo lacagta ee W. Arrimaha Dibedda, waa inay Safaaradaha u dirtaa qayb (Trimestre) walba bisha ugu horreysa 10 keeda si ay ugu tagto wakhtiga ku habboon.

QODOBKA 13AAD

Telekiska iyo Telefoonka waxaa loo isticmaali karaa shaqada dawladda oo kali ah. Lacagtii la arko in loo istimaalay wax aan shaqada dawladda ahayn ama aan loo baahnayn, wax aalaga jarayaa Danjiraha Gunnadiisa ama siihayaha.

QODOBKA 14AAD

Wixii isgaarsiin ah waa in koleyga siraayadda lagu soo ridaa iyadoo la ilaalinayo sirta iyo kharajka badan oo ku baxaya Telekiska iyo Telefoonka, lagana soo dirin waxaan degdeg ahayn. Telekiska iyo Telfoonka waxaa loo isticmaalli karaa markii ay baahi weyn jirto.

Kolayga laguma soo diri karo warqadaha ka baxsan kuwo dibloomaasiyiinta Xaasaskooda iyo Carruurtooda u soo diraan.

QODOBKA 15AAD

Alaabta Dawladda ee Safaaraddu leedahay waa in la diiwaangeliyaa, diiwaankaasoo lagu eedeynaayo sida uu ku soo galay, sida uu uga baxay (Jabid, Xadid, dhumid iyo qiimahooda iwm.)

Alaabtaas, dib looma iibin karo, cidna lama siin karo iyadoon amar laga haysan Wasaaradda Arrimaha Dibadda, isla markaasna waa in si joogta ah loo xannaaneeyo Hantida dawladda ee aan dibadda ku leenahay iyadoo ay tahay danta laga leeyahay inuu cimriyo, inuu ahaado mid u qalma sharafta uu mudan

QODOBKA 16AAD

Si loo ilaaliyo sirta, nabadgelyada iyo sharafta Safaaradada, kama shaqayn karo qof aan Soomaali ahayn. Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa magacaabeysa dad la wareega hawsha Xoghaynta Safaaradda, xisaabaha iyo xilkii kale ee ay hayeen dadkaas ajnabiga ahi. Safaaraddu waa qoran kartaa qof Soomaali ah sida Telefoon-haye, shufeer, Kariye, Karaani iyo Ilaaliye iyo iwm. Markii la hubiyo inuu yahay, waddani, daacadna u yahay waddankiisa iyo Ummaddiisa, shaqsiyadda wanaagsanna leeyahay.

QODOBKA 17AAD

Carruurta Diplomaasiyiinta: markii la arkay dhibaatada ka timid carruurtaas dibedda la geynayo, waxaa habboon inaan Safaaradaha loo beddelin qof Diplomaat ah oo 3 (seddex) carruur ka badan haysata.

Si carruurta Diblomaasiyiinta hiddohooooda, dhaqankooda uga dhumin iyo waxbarashadooda lafteeda, waxaa habboon in waddanka hooyo wax ku bartaan, ilaa Dugsiga Sare.

QAYBTA 3AAD GAADIIDKA SAFAARADDA.

QODOBKA 18AAD

B) Gaadiidka Dawladda waxaa oo kaliya oo loo isticmaali karaa shaqada safaaradda.

T) gaadiidka Safaaradda laguma qaadi karo, Xaasas iyo carruur midna. Danjiraha iyo Diblomaasiyiinta kale ayaga ayey jirtaa sidii ay u nidaamsan lahaayeen arrimahooda gaarka ah.

J) Gaadiidka Safaaradda oo dhami waa inay ku xaroodaan Xarunta Safaaradda ee meel kale lama dhigi karo.

X) Baabuurta Safaaradda qofkii jebiya ayaa laga jarayaa kharajkii ku baxa sameyntiisa. Wax alla wixii dhibaato ka yimaadana asaga ayaa mas'uul ka ah oo dawladda Soomaaliyeed shaqo kuma leh.

Kh) Baabuurta Safaaradda waxaa wedi kara shufeerka iyo haddii loo baahdo Diblomaassiyiinta.

QAYBTA 4AAD GURIGA DANJIRAHA

QODOBKA 19AAD

B) Guriga Danjiraha waxaa ku hoyan kara oo kaliya Danjiraha, Xaaskiisa iyo Carruurta uu dhalay.

T) Danjiraha ama Sii-hayuhu markii uu guriga degayo asaga iyo Xaaskiisu waxay kaliya oo la imaan karaan (personal Effects). Lamana soo gelin karo alaab aan Dawladdu lahayn.

J) Markii Danjiruhu ama Sii hayuhu ka guurayo Guriga waxaa kaliya oo uu kala bixi karaa Gurigaas (personal effects).

X) Guriga Danjiraha waa inay ka muuqataa Hiddihii, Dhaqankii, Haybaddii iyo sharaftii Ummadda Soomaaliyeed.

Sharciga kan waxaa lagu dhaqayaa Ergooyinka, Safaaradaha, Qunsuliyadaha Guud, Kuqaybsanaha Arrimaha Askarta, Tacliinta, Ganacsiga iyo iwm. ee hoos yimaada Safaaradaha.

QAYBTA 5AAD KORMEER

QODOBKA 20AAD

B) Wasaaraddu waa inay sannadkiiba ugu yaraan hal mar ay guddi kormeer ah u dirtaa Safaaradaha, in loo hubiyo xannaanada hantida Dawladda oo halkaas taal.

T) Safaarad walba waxaa lagu qaymayn doonaa sida ay xilkeeda u gudato.

QODOBKA 21AAD

waxaa la buriyey xeerkasta oo aan la socon karin kana soo horjeeda Xeerkan.

QODOBKA 22AAD

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa durba, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Sharciga ah ee J.D.S. S/Gaas Maxamed Siyaad Barre,

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
MUQDISHO, 14 DIC. 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 20 Nof. 1980 Dallacaad Sarkaal nimo:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qod. 82aad;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

K/Koowaad 4675 Axmed Maxamed Warsame oo ka tirsanCiidanka Boliiska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey Derejada XIDDIGLE laga bilaabo 16.11.1980.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20.11.1980

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan Aragnay ee Diiwaan gelinnay

Diiwaanka L. 1 Bogga L. 21

Muqdisho, 3 Jan. 1981

Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 9 ee 24 Dis. 1980 Dallacaad Sarkaalnimo:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jahuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya qodobka 82aad;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada Taliyaha Ciidanka Soomaaliyeed uu soo jeediyey kuna qoran xaashidiisa XOG/A/8/1 ee 24.12.80.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Layli Sarkaal Maxamuud Maxamed Cusmaan oo ka tirsan Ciidanka Boliiska waxaa loo dallacsiiyey derejada XIDDIGLE laga bilaabo (anzianita) 5.11.1979 taariikhdaasoo ah wakhtigii uu dhammaystay qaybtii hore ee waxbarashada Akadeemiyadda uu hadda ku jiro ee Dalka Talyaaniga una gudbay qaybtii labaad. Mushahaar ahaan waxa looga bilaabayaa 1.10.1980ka.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24.12.1980

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan Aragnay ee Diiwaan gelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 22

Muqdisho, 3 Jan. 1981
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 10 ee 25 Dis. 1980 Dallacaad Sarkaalnimo:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS qodobka 82aad;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambar 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran xaashiyaha XOG/A/8/1 ee 28.12.80. iyo 29.12.80.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Layli Sarkaalka iyo Kormeerayaasha hoos ku qoran oo ka tirsan Ciidan Boliiska Soomaaliyeed waxa loo dallacsiiyey Xiddigleyaal laga bilaabo 1.10.1980ka:

1. Layli Sarkaal 8648 Cumar Cabdi Cilmi -Xiddigle
2. K/Koowaad 6848 Baashir Maxamed Jaamac -Xiddigle
3. K/Koowaad 1378 Cabdi Hilowle Calasow -Xiddigle
4. K/Koowaad 4218 Garaad Nuur Cabdulle -Xiddigle

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25.12.1980

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan Aragnay ee Diiwaan gelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 24
Muqdisho, 3 Jan. 1981
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 11 ee 29 D[illegible]. 1980 Dallacaad:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuur JDS qodobka 82aad;
ISAGOO ARKAY : Sharciga lambar 2 ee 23.[illegible].1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeed[illegible]y Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ku [illegible]qoran xaashiyaha XCG/A/8/1 ee 28.12.80.

WUXUU XEERAY

qodobka 1aad

Dhamme Yuusuf Cusmaan Guuleed oo [illegible]tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxa loo da[illegible]csiiyey derejada Gaashaanle laga bilaabo 16.12.80.

Laba Xiddigle Gurxan Xirsi Aadan oo ka t[illegible]rsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxa loo dallac[illegible]yey derejada Dhamme laga bilaabo 16.12.80.

qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa [illegible]axaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga [illegible]ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29.12.1980

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan Aragnay ee Diiwaan gelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 23

Muqdisho, 3 Jan. 1981
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

QAYBTA SADDEXAAD

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Abuukar Cabdiraxmaan ay u qoratay arji waaxda Sah. iyo Deg. Mag. ee W. H. Guu Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8-11.78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaa Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 37 M.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 41 M.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 38 M.

B a r i waxaa ka xiga: J I D

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood loga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO, 25 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 84

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Luna Africa uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 4.10.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 100X60 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Bandar Qaasim

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii dananaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arka karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon gaalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO, 25 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 83

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faadumo Xaaji Maxamed U. ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mga. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10.10.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 354 M

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 353 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 25.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 85

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faadumo Xaaji Axmed ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.6.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 107 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 111 M

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 110 M

Qifkii daneynaaya dhulkaa wuxuu sifiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu s ooqoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 29.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 86

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddenayaa in Jaalle Cabdulqaadir Cali Dhaga Qoola uu u soo qortay arji Waaxda Sahank iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 108 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 112 M

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 109 M

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux uusi fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 29.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 87

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Wax aala caddenayaa in Jaalle Maxamed Muuse Bahdoon uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 105 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 109 M

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 108 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 29.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 88

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddenayaa in Jaalle Cabdullaahi Cali Coofle uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.12.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi wax aaka xiga : Dhul Lamb. 110 M

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 111 M

B a r i wax aaka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmoodla ga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 29.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 89

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Ducaale Jaamac uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 28.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay RETANGOLARE Addimihiisuna yihiin 30X20 ku fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 310 M

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 312 M

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 90

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Wax aala caddeynayaa in Jaalle Dham. Cabdulaahi Saciid Xersi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalint. taariikhdu ahayd 2.12.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 375 M

Koonfur waxaa ka xiga: J I D

Galbeed waxaa ka xiga: J I D

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 378 M

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si ffiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISH. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 91

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Maxamed Xuseen (Qaraawa) uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taa riikhdu ahayd 20. 2. 79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 360 - 361 M

Koonfur waxaa ka xiga: J I D

Galbeed waxaa ka xiga: J I D

B a r i waxaa ka xiga: J I D

N A A D O D H U L

Qofkii dananaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar-Qaabkiisuna yahay RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 1200 MQ.
SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN. ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

MUQDISH. 29 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 92

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Xersi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 28. 4. 79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna ya-hay RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 313 M

Koonfur wax aaka xiga: Dhul Lam. 327 M

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam 314 M

B a r i waxaa ka xiga: J I D

Qofkii dananaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar-ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo-di karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 93

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ijaaba Xaaji Cabdi Gurey ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10.12.79 ay kuweydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0647 Y

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0546 Y

B a r i wax aaka xiga: Dhul Lam. 0550 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arka karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmool laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Maxamed Maye Xaaji

L. 94

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Xaaji Cabdi Gurey ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10.12.79 ay ku weydiisatay gabal dhul ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0549 Y

Koonfur Waxaa ka xiga: W a d d o

Galbee dWaxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0548 Y

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0552 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 95

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamax maalintii taariikhdu ahayd 6.7.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 2091 Y

Koonfur Waxaa ka xiga: W a d d o

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 2092 Y

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 2088 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L.96

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Qaali Maxamed Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: W d d o

Koonffur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0380 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0379 Y

B a r i Waxaa ka xiga: W a d d o

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 97

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Baliila uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalint iitaariikhdu ahayd 29.4.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 209 M

Koonfur Wax aaka xiga: Dhul Lamb .189 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d M

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 198 M

Qofkii daneynaaya dhulk aawuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi muddo (30) Sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafintta Sharciyada Rasmiga ah.

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 98

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shamso Ibraahim Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintiiii taariikhdu ahayd 19.1179 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.-

SOOHDIMIHIIS NA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0578 Y

Koonfur Waxaa ka xiga: W a d d o

Galbeed Waxaa ka xiga: W a d d o

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0579 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 99

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANAKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D O D H U L

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Ruun Cali Cabdulla uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 23.1.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna waa: Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya: 600 MDH.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 02

Koonfur Waxaa ka xiga: W a d d o

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 05

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 08

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 29 MAR 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 100

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA & DHULKA

Gobolka Shabeellada Hoose

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Maxaadow uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 12.10.72 Gobol Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Degmada Baraawe Qaabkiisu yahay Quadrato. Addimihiisu yihiin 22,00X22,00- kuna Fadhiya 484,00 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xig : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga : Waddo

Qafkii daneyn:aya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkaan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalamboot, 8/2/81

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kus/ Suufi Shariif Maleele

X 1

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA & DHULKA

Gobolka Shabeellada Hoose

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Sheekh Cabdalla & Saciid Sheekh ay ku soo weydiisteen Arji Taariikhdiisu ahayd 2.3.70 Gobal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Baraawe Qaabkiisu yahay Quadrato Addimihiisuna yihiin 26,00X26,00 kuna Fadhiya 676,00 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul bannaan

Koofur waxaa ka xiga : Warshadda Biyaha Saalus;

Galbeed waxaa ka xiga : Guriga Cusmaan Goy;

Bari waxaa ka xiga : Dhul bannaan.

Qafkii daneyn:aya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkaan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalamboot, 8/2/81

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kus/ Suufi Shariif Maleele

X 2

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA & DHULKA
Gobolka Shabeellada Hoose

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Abuukar Cali Calasoow uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 14.9.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisu yahay 3,75X7,00- Addimihiisu yihiin kuna Fadhiya 26,25 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Dhul bannaan

Galbeed waxaa ka xiga : Dhismaha Maxamed Abuukar Cumar

Bari waxaa ka xiga : Dhismaha Sheekh Ibraahim Maxamed

Qaʼkii daneynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkaan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daubaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dheeiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalamboot, 8/2/81

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Kus/ Suufi Shariif Maleele

X 3

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA & DHULKA
Gobolka Shabeellada Hoose

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Abuukar Cumar uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 14.9.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisu yahay Rettangolo Addimihiisu yihiin 3,75X7,00- kuna fadhiya 26,25 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Dhul bannaan oo Suuq ah;

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga : Dhismaha Abuukar Cali Calasow

Qafkii daneyn:aya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkaan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalamboot, 8/2/81

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Kus/ Suufi Shariif Maleele

X 4

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA & DHULKA

Gobolka Shabeellada Hoose

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Ibrahim Maxamed uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 14.9.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisu yahay Addimihiisu yihiin 3,75X7,00- kuna Fadhiya 26,25- MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo;

Koofur waxaa ka xiga : Dhul bannaan oo Suuq ah;

Galbeed waxaa ka xiga : Dhismaha Maxamed Axmed Cabdi

Bari waxaa ka xiga : Dhul bannaan oo Suuq ah.

Qafkii daneyn:aya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkaan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalamboot, 8/2/81

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kus/ Suufi Shariif Maleele

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA & DHULKA

Gobolka Shabeellada Hoose

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Cabdi uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 14.9.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisu yahay Retangolar Addimihiisu yihiin 3.75X700 kuna Fadhiya 26,25; MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo;

Koofur waxaa ka xiga : Dhul bannaan oo Suuq ah;

Galbeed waxaa ka xiga : Abuukar Cali Calasow;

Bari waxaa ka xiga : Sheekh Ibraahim Maxamed

Qafkii daneyn:aya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkaan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalamboot, 8/2/81

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kus/ Suufi Shariif Maleele

X 6

— MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE —

UJEEDO: DEKEREETO DI AMMORTAMENTO

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. SH/HOOSE

HADDUU ARKAY : Dacwadda uu keensaday Jaalle Maxamed Daahir Aadan ee taariikh. 4.2.81;

HADDUU ARKAY : Ogesiiska Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Marka ee taariikh. 3.2.81;

HADDUU OGAADAY : Waxay ku saabsantahay iyo Ogeysiiska aan soo xusnay;

HADDUU ARKAY : Qod.69 D.L. 9.9.65 N.2 lumid Buugga Keydka Lamb. 3124 kuna qorantahay lacag dhan Sh.So. 1.427/= Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Marka una ku qoran yahay Buuggaas J/le Maxamed Daahir Aadan.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka ka dib markay ka soo wareegto 15 maalmood maalint aDekereetada lagu sharciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Daahir Aadan ama qof ka sita Wakaalad Sharci ah ayadoo la sugayo muddada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Marka, 4.2.81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. SH/HOOSE

— Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur —

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA
GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Jeeg wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 261769 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Xuseen Jaamac Xasan sida ku cad warqadda lamb. 001551 Taariikh 10.2.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2.9.9ii65,

— WUXUU XEERIYEY —

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u celiso Xuseen Jaamac Xasan Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laag keenin.

Muqdisho. 19.2.81

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

W. S. — Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran

HADDUU HUBIYEY : In Jeegga waeega dhumay oo lambarkiisu ahaa 261770 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 40.000 uu iska lahaa Xuseen Jaamac Xasan sida ku cad warqadda lamb. 001551 Taariikh 19.2.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY : Qod 69 sharciga lam. 29.9.65,

— WUXUU XEERIYEY —

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 261770, oo ku qoran Magaca Xuseen Jaamac Xasan ayna ku jirto Sh. So. 40.000

— WUXUU FASAXAY —

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo Xuseen Jaamac Xasan Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.2.81

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

W. S. — Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 16537, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xaruunta kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 1.631/= uu iska lahaa Cabdullaahi Xasan Caafiyow sida ku cad warqadda lamb· 0040 taariikh 2.2.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta·

HADDUU ARKAY : Qod.69 sharciga lamb.2 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 16537, oo kp qoran magaca Cabdullaahi Xasan Caafiyow ayna ku jirto Sh.So. 1.631/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xaruunta u beddelo Cabdullaahi Xasan Caafiyow Buugga Keydka ee kor k utilmaaman una sameyso mi dla mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.2·81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G· BANAADIR

— Cabdullaahi Maxamed Maax —

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 14.042, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh. So. 640,96/= uu iska lahaa Maxamuud Salaad Cigaal sida ku cad warqadda lamb. 0143 taariikh 14.2.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta;

HADDU ARKAY : Qod.69 Sharciga lamb.2 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 14.042, oo ku qoran magaca Maxamuud Salaad Cigaal ayna ku jirto Sh.So. 64.096/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xaruunta u beddelo Maxamuud Salaad Cigaal Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.2.81

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

— Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —